

Adiga samee xulka heesasha noloshadaada



Muuusigu
xusuus
ayuu soo
celiyaa

Buug shaqo oo kaa caawinaya
inaad taariikhda noloshadaa
muusig ahaan ugaga sheekeyso



Awoodda muusiga

Muusiga ayaa caawin kara dadka qaba assaasaqa.



Dhageysiga muusiga shaqsi ahaan micno kuu leh ayaa dadka assaasaqa qaba ka caawin karta inay dejyaan maskax welwelsan, u keenaya farxad, oo xitaa ka caawin kara inuu waqtiga dhakhso ugu socdo.

Muusigu waa waxyaalo neerfa taa taabta maxaa yeelay waxa uu hal mar wada kiciyaa qeybo badan oo maskaxda ka mid ah. Waxa ay taasi micnaheedu tahay in iyadoo ay xitaa qeybo ka mid ah maskaxdu dhaawacmeen uu hadana muusigu uu weli gaari karo qeybaha kale.

Miyaad waligaa maqashan wax muusig ah oo ay taas dib kuugu celisay waqti gaar ah oo ka mid ah noloshada? Ama aad adigoo raadiyaha dhageysanaaya aad ka maqashay hees ku xasuusinaysa qof gaar ah?



Muusigaasi waxa uu leeyihiin shucuur shaqsi ahaaneed ama xusuus ku lifaaqan. Waxay wadajir ugu sameeyaan xulka heesaha adiga noloshada

Playlist for Life waa muusig iyo hey'ad samofal oo assaasaqa qaabilsan. Cilmi baaris sanado badan la sameeynayay ayaa muujisay in shidashada liistada la dhageysanaayo ay la noolaanshaha assaasaqa ka dhigi karto mid ka sahlan oo ka farxad badan.

Wax ka ogow anaga talodayada khuseysa sida muusigu assaasaqa ugu caawin karo dhamaadka buugyarahan. Wixii macluumaad dheeri ah booqo www.playlistforlife.org.uk ama anaga nagala soo xidhiidh telefoonka **0141 404 0683**.

Waxaanu buugan shaqada kugula eegi doonaa marxaladaha aad ku dhiseyso liiska shaqsi ahaaneed ee la dhageysanaayo ee adiga ama dadka aad jeceshay leeyihiin.

Sii akhriso si aad ugu bilaabto heesahaaga xulka ee adiga kuu gaarka ah...

Bilowga

Heeso ku xasuusinaaya meesha aad ka timid. Koox degaanka ah oo caan ah. Heesaha marwalba lagu shidi jiray xafladaha. Heesaha kooxaha ciyaaraha. Heesaha dhaqanka.

Halkee ayaad ku dhalatay, halka uu qoyskaagu ka soo jeedo iyo halka aynu ku soo barbaarnay ayaa dhamaantood saameyn weyn ku leh aqoonsigeena shaqsi ahaaneed. Waxa jira heeso isla markaaba kaa dhigaya mid dareemaaya inaad tahay mid ku xiran dad ka yimid isla goobta aad adiga ka soo jeedo iyo noocyo muusig ah oo isla markiiba dib kuugu celin kara waqti iyo goob.

Miyey jiraan heeso ku xusuusinaya meesha aad ka soo jeedo ama meel adiga kuu gaar ah?



Heesta:
I belong to
Glasgow
Will Fyffe



Waxaan ku dhashay magaalada Glasgow waxayna heestani marwalba i xasuusisaa waalidkey iyo yaraanteydii.

Catherine

Xasuusta
Muusiga



Halka hoos ku buuxi heesahaaga iyo xusuustaada – isticmaal kaliya mid ka mid ah sanduuqyada ama dhamaantood wada buuxi. Waxaad horey ugu boodi kartaa qeybta xigta oo aad hadhow qeybtan dib ugu soo laaban kartaa haddii aad jeceshahay.

Heesta: *I belong to Glasgow Will Fyffe*

Magaalada: *aan ka soo jeedo iyo aniga waalidkay*

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Adiga carruurnimadaadii

Heesaha carruurta Heesaha dugsiya xadaanada. Heestaad kooxda dugsiya qaado ugu jecleeyd. Heesaha uu aabahaa ku foodhyin jirey. Heesaha xadhig boodaleysiga. Heesaha diiniga ah. Heesaha isboortiga. Heesaha Gabdhaha Hagayaasha ah marka dabka la kulaalaayo.

Waxa jira heeso carruurnimadaadii la maqlay oo waligeena inala joogi doona. Muusigu waa wax inagu xeeran laga bilaabo markaynu dhalano iyo xitaa xusuusaheena ugu horreeyaa waxay yeelan doonaan muusig iyaga ku xiran.

Xasuusta Muusiga

Heesta:
We'll Meet Again
Vera Lynn

“

Waxaan ahaa 12 sano jir markuu dagaalku bilaabmay waxaan markaas xasuustaa inaan reerkayga heestan la dhageysan jiray.

Mary



Miyey jiraan heeso ku xusuusinaya carruurnimadaadii?

Hoosta ku buuxi heesaha iyo xusuusahaaga.

Heesta: *We'll Meet Again Vera Lynn*
Waxaan la dhageysanaayey reerkayaga.

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Adiga Kuuskaaga Xasuusaha

Waa mid cilmi ahaan lagu xaqiijiyey inaynu xusuus badan abuurano inta u dhaxeysa 10 ilaa 30 sano jirka marka loo eego waqtiyada kale ee nolosheena oo dhan. Taasi waxa loo yaqaan 'Kuuska Xusuusta'.

Raadinta xusuusta muusiga ee waqtigan ayay u badan tahay inay keento natiijo badan, inkastoo aad sidoo kale yeelan doonto xusuus adag oo wakhtiyada kale ee noloshaada ah.

Ka shaqee adiga Kuuskaaga Xasuusaha

Sanadka dhalashada: Bilow:
+ 10 =

Sanadka dhalashada: Dhamaad:
+ 30 =

Maxaad dhowr sanno uga soo dooran weyday kuuskaaga xasuusaha ee 'Buuga 100 Sano'?



Waxqabadyada ugu waaweyn

buuga boqolka sanno

Waxaanu qeybinaynaa liistada 100 heesood ee ugu sarreeya sanad walba, laga bilaabo 1915–2015, iyadoo bilaash ah bogga www.playlistforlife.org.uk/the-100-years-book ama nuqul telefoonka ku iibso 0141 404 0683.



Hoosta ku buuxi heesaha iyo xusuusahaaga.

In the Mood oo uu sameeyey Glenn Miller
Maalmahaan *jaasi jirey*

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Xusuusta Gaarka ah:

Aroosyada: Fasaxyada qoyska. Xafladaha waaweyn ee maalmaha dhalashada Dhalashada ilmaha. Xafladii muusiga ee kuugu horeysay Qalan kabinta. Habeenada xafladaha.

Dabaaldegyada, guulaha nolosha iyo dhacdooyinka gaarka ayaa badiyaa leh muusig iyaga ku lifaaqan – laga yaabaa inay tahay hees xafladii muusiga ee kuugu horeysay ee aad tagto ama heesaha had iyo jeer ku kiciya si aad xafladaha uga qaab jaasto.

Muusigee ayaa ku xasuusiya dhacdo gaar ah ama waqtiyo xiiso leh?



Xasuusta
Muusiga



Heesta:
Amazed
Lonestar



Ninkayga Malcolm ayaa tan iigu heesa. Taasi waa heestii arooskayaga.

Carol

Hoosta ku buuxi heesaha iyo xusuusahaaga.

Heesta: *Amazed Lonestar*
Maalinti arooskayaga

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Heesaha keena inaad la qaado

Heesadaa aad karaoke ku heesto. Dhawaaqa xayaysii xiiso leh. Heesaha gawaarida ee aad ugu jeceshay Mawduucyada TV-ga

Waxaynu dhamaanteen leenahay heeso lugaha ina taataabta oo inaga dhigaya qaar doonaaya inay heesaan. Heesahani waa kuwo qeyb weyn ka ah heesaha xulka ee noloshaada.

Heesahee ayaa kaa dhiga qof raba inuu heeso ama jaaso?

BBC Music Memories

Waxa bogga internetka ee BBC Music Memories ku jira muusig faro badan oo la kala doordooran karo kaas oo kaa caawin kara inaad sameysato xulka heesaha adiga noloshaada. Qalabkan ka hel <http://musicmemories.bbcrewind.co.uk>

Hoosta ku buuxi heesaha iyo xusuusahaaga.

Heesta: *Super Trouper*

Fasax dalxiis *qoys ahaan aanu gaadhiga guriga ah Spain ku tagney*

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Dadka muhiimka ah

Waxyaabaha qoysku xiiseeyo. Heesaha uu waalidkaa qaadi jirey. Heesaha ay asxaabtu wadaagaan. Muusiga qof gaar ah ku xusuusiya.

Muusigu waa hab cajiib ah oo dadka aynu jecelnay kuula xiriirno. Maxaad isugu dayi weyday inaad waxqabadkan xiisaha leh u isticmaasho si uu muusigu iskugu kiin xiro?

Ka fikir qof nolashaada muhiim u ah oo talaabooyinkan raac:

- 1 Miyey jirtaa heeso iyaga ku xasuusiya? Maxay heestaasi iyaga kuu xasuusisaa?
- 2 U qor qoraal, fariin ama emayl qofka si aad ugu qabanqaabiso wacitaan telefoonka ama fiidyowga ah. Weydii inay ka fikirnaan hees ay iyagu kugu xusuustaan.
- 3 Have your call and play or sing the song to them. Share your memory of them and that tune. Miyay iyagu xasuustaan sidoo kale? Hees nooc ee ah ayayiyagu doorteen? Waa maxay xasuustoodu?



Heesta:
The Air
I Breathe
The Hollies

**Xasuusta
Muusiga**



Markii aanu bilownay inaanu is shukaansano ayuu lan sameyn jiray inuu heestan aniga oo telefoonka iiga shido/maqashiiyo. Waxay ahayd mid jaceyl badan leh.

Lynda

Hoosta ku buuxi heesaha iyo xusuusahaaga.

Heesta: *The Air I Breathe The Hollies*

Taariikhda: *Is shukaansiyadii ugu koreysa ee Ian*

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Heesta:

Xusuusta:

Liiska heesaha



Hambalyo! Waxaad qaaday talaabada igu horeysa ee lagu sameynaayo xulka heesaha adiga nolashaada. Liisata heesaha waxa sidoo kale loo yaqaan 'liistada la dhageysanaayo', taas oo ah meesha hey'adayada samofalka ee Playlist for Life uu magaceedu ka yimid.

Samee liisto waxtar leh oo dhammaan heesaha ku jira adiga xulkaaga heesaha adigoo hoosta ku qoraaya. Haddii adiga ama qof aad taqaanid uu internetka heli karo boggayaga internetka ku soo qor heesahaaga waxaannu kuu soo diri doonnaa liisto Spotify ku jirta oo heesahaaga oo bilaash ah si aad uga dhageysan karto kombiyuutarkaaga, telefoonkaaga casriga ama tablet-kaaga.

www.playlistforlife.org.uk/playlist-maker

Ciwaanka heesta	Fanaanka
.....
.....
.....
.....
.....
.....

Ciwaanka heesta

Fanaanka

.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....
.....

Sida loo dhageysto liiska la dhageysanaayo

Uma baahnid wax qalab cusub ah si aad ugu raaxeysato heesahaaga. CD, cajalado iyo cajaladaha rikoodhka ayaa dhamaantood si fiican ugu shaqeeya haddii ay tani tahay waxa aad caadiyan dhageysiga muusiga u isticmaasho.

Waxaad bogayaga ka heli kartaa talooyin badan oo tikniyoolajiyada iyo siyaabo kale ee wax loo dhageysto ku saabsan:

www.playlistforlife.org.uk/how-to-listen

Wixii caawimo iyo talo ku saabsan ee sameynta liistada la dhageysanaayo, kala soo xiriir:

✉ info@playlistforlife.org.uk

☎ 0141 404 0683

📘 facebook.com/playlistforlifeUK

Inta ugu badan ka faa'iideysanaaya muusigaaga

Waxa halkan ku yaala shan tilmaamood oo ku saabsan sida iyo goorta ah tahay in la dhageysto heesahaaga xulka si looga faa'iideysto awoodda neerfaha ee muusikada shaqsi ahaaneed. Waxa tilmaamahaas isku deyay oo tijaabiyay dadka uu assaasaqu ku dhacay.

1

Wada dhageysiga

Wada dhageysiga iyadoo la wada joogo ama telefoonka laga sameynaayo ayaa ah qeybta ugu wanaagsan ee adiga heesahaaga xulka. Maxaa muusigaaga ula wadaagi weyday saaxiib ama qof aad jeceshahay?



2

Birif laga qaato

Maalmaha xunxun liistada u isticmaal sidii fursad aad ugaga nafisi laheyd. Muusiga shid oo naftaada sii 30 daqiiqo.



4

Sii qaado markaad socoto

Haddii aad awoodi karto inaad gurigaaga ka baxdo oo MP3 player haysato, xusuusnow inaad liistada la dhageysanaayo sii qaadato. Waxaad markaana dhageysan kartaa markasta iyo meelkasta oo aad u baahan tahay. Ha iloobin inaad aalada aad wax ku dhageysanyso baateriga sii buuxsato!

3

Dhageyso nus saac ka hor markay hawl adagi jirto

Cilmi baaris ayaa muujineysa in haddii aad nus saac ka hor shidato liistada la dhageysanayo intaan hawla adag qabanin ay hawsha kuu fududeynayso.

5

Dadka kale isku xidhaaya

In laga hadlo heesha ku jira liistada aad dhageysaneyso ayaa ah hab fiican oo lagu bilaabaayo wada hadalku uu adag yahay.



La wadaagaaya
awooda muusiga
shakhsiga ee
dadka la nool
assaasaqa



**Playlist
for Life**



www.playlistforlife.org.uk

Playlist for Life, Govanhill Workspace, 69 Dixon Road, Glasgow G42 8AT
© 2021 Playlist For Life. Dhamaan xuquuqda way dhowrsan tahay. Hey'ad diiwaangashan: SC044072